



Bus-bus

Xaashida xaqiiqada



Bus-buska waa cudur halis ah oo uu sababo fayraska variola. Iyadoo ay sabab u tahay ku guulaysiga barnaamijyada tallaalka, bus-buska waa la ciribtiray.

Waa la kala qaadaa, badanaa waxaa la iskugu gudbiyaa qufaca ama hindhisada. Marar dhif ah, dadku waxay ka qaadaan taabashada dareeraha nabaro furan iyo qolof ama walxaha uu furuqa gaaray sida gogosha.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Xumad/qandho sare



Madaxa iyo Jir xanuunka



Firiric



Matag


Bus-buska waxa uu ku bilaabmaa qandho badan, madax iyo jir xanuun, mararka qaarkoodna matag. Firiiric ayaa soo baxa oo fida oo noqda kuuskuus iyo nabarro ay ka buuxdo malax. Kuwani waxay maalaysan, qolofaysan, oo ay fuqi doonaan qiyaastii saddex toddobaad ka dib, iyagoo kugu reebayo nabar muuqdo. Calaamaduhu waxay badanaa bilaabmaan 17 ilaa 19 maalmood kadib marka uu fayrasku jirka galo, celcelis ahaan 10 ilaa 14 maalmood.

Ka hortagga & Daawaynta

- In aad tallaal qaadato waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago bus-buska. Iyadoo aan si ballaaran loo helin, tallaalka ayaa loogu heli karaa xaalad degdeg ah awgeed.
- Ma jirto daaweyn la xaqiijiyay oo lagu daweeyo bus-buska. Daawooyinka qaar ayaa laga yaabaa inay gacan ka geystaan daawaynta ama ka hortagaan inuu ka sii daro cudurka.



Wixii Macluumaad Dheeraad Ah



Kala xiriir dhakhtarkaaga ama Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada ee Maine 1-800-821-5821 wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa www.cdc.gov/smallpox.